

# Nidaamka Cabashada Tixgelinta Naafonimo

Haddii aad ka codsatay nidaamka maxkamada tixgelin naafonimo, oo aadan u arkin in go'aanku raacay Qanuunka Dadka Naafooyinka Siinaya Helid ee Laanta Garsoorka Maine, waxaad heli kartaa in qof kale dib u eegid ku sameeyo go'aanka.

Codsigaaga dib u eegidda ayaa loo yaqaan Cabasho. Waxa aad u baahantahy inaad sameeyso wuxuu ka xiranyahay in go'aanku ka so baxay:

- (1) **Sarkaal garsoor** (Caadil, Xaakin, ama Garsoore), ama
- (2) Shaqaale laan maxkamadeed kaas oo **aan ahayn sarkaal garsoor**.

## Go'aanada ay Gaareen Saraakiisha Garsoorka

Si aad u weydiisato dib u eegis tixgelin go'aan uu gaaray **sarkaal garsoor**, waa inaad soo gudbiso codsi aad racfaan kaga qaadanayso go'aankaas si waaqfasan Xeerarka Madaniga ee Maine ama habka Dambiyada. Waa inaad soo raaciso nuqul ah go'aanka, xukunka, ama amarka aad dooneyso in dib loo eego. Haddii aad leedahay qareen, qareenkaas ayaa caawin karo codsiga dib u eegista.

## Go'aanada ay Gaareen Shaqaalaha Laanta Maxkamada ee aan Ahayn Saraakil Garsoor

Si aad u weydiisato dib u eegid tixgelin go'aan uu gaaray shaqaale maxkamadeed kaas oo aan ahayn **sarkaal garsoor**, waa inaad codsigaaga cabasho kusoo gudbiso qoraal.

Fadlan isticmaal Foomka Cabashada Tixgelinta Naafonimo (Grievance Form for Disability Accommodation). Waxaad ka heli kartaa nuqul ah foomka cabashada webseytka Laanta Garsoorka: [www.courts.maine.gov/citizen\\_help/access\\_interp.html](http://www.courts.maine.gov/citizen_help/access_interp.html).

Cabashadaada, gaar ahaan foomka cabashada, waa inaad ku sharaxdaa si qoraal ah:

- (1) waxa go'aanku uu ahaa,
- (2) taariikhda go'aanka la gaaray,
- (3) qofka go'aanka gaaray, iyo
- (4) waxa aad u maleeynayso inuu go'aanku ku qaldanyahay.

Waa inaad cabashadaada ku dirtaa Iskuduwaha Helitaanka Maxkamada ee Xafiiska Maamulka Maxkamadaha: Court Access Coordinator, Administrative Office of the Courts, P.O. Box 4820, Portland, ME 04112-4820, ama ku dir emaylka: [accessibility@courts.maine.gov](mailto:accessibility@courts.maine.gov)

Haddii aadan raaci karin nidaamka cabashada sabab naafonimo darteed, fadlan la xiriir Iskuduwaha Helitaanka Maxkamada 207-822-0718.

**MUHIIM: Laanta Garsoorka waa inay heshaa cabashada 21 maalin gudohooda go'aanka kadib!**

Iskuduwaha Helitaanka Maxkamada ayaa dib u eegid ku sameen doona cabashadaada ka dibna go'aan bixin doona 28 maalmood gudahooda kadib marka cabashada xareeyso, haddii dib u eegida waqtigaas lagu dhameystiri waayo moyee.

Haddii Iskuduwaha Helitaanka Maxkamada gaaro go'aanka aad ka cabaneeyso, Maxkamada Maamulka Gobalka ayaa sameen doonta dib u eegidda oo bixin doonta go'aan 42 maalmood gudahooda kadib marka aad xareeyso cabashada, haddii dib u eegidda waqtigaas lagu dhameystiri waayo mooyee.

Dib u eegida ka dib, haddii la go'aamiyo inaad xaq u leedahay tixgelin naafonimo, Iskuduwaha Helitaanka Maxkamada ayaa sameen doonta isbedellada lagama maarmaanka si loo tixgelintu u dhacdo.

### **Sirta**

Laanta Garsoorka ayaa sameen doonta dadaalo macquul ah si cabashadaada iyo macluumaadka ku jira loo dhoowro heerka loo baahanyahay si loo sameeyo dib u eegid buuxda oo cadaalad ah. Haddii Laanta Garsoorka sharciga uuga bahaanyahay inay bixiso wax ka mid ah macluumaadkaaga, Laanta Garsoorka waa inay ka jawaabdaa shardigaas.

Laanta Garsoorka waxay hayneysa Cabashadaada iyo warqadaha iyo wixi qalab ku saabsan cabashadaada sedex sanadood laga bilaabo taariikhda la gaarey go'aanka kama dambeysta.

### **Xuquuqyada Kale iyo Bogsiinta**

Nidaamka cabashada ma xadadaayo xuquuqda kale ama bogsiinta laga yaabo inaad sharci u leedahay.

### **Wixii Su'aalo Kale ah ama Walwel**

Laanta Garsoorka waxa ka go'an helid Maxkamad buuxda oo cadaalad ah. Haddii aad wax su'aal qabto ama walwel khuseeya habka cabashada, faldan la soo xiriir Iskuduwaha Helitaanka Maxkamada (Court Access Coordinator).

Court Access Coordinator  
Administrative Office of the Courts  
PO Box 4820, Portland ME 04112  
Telefoon: (207) 822-0718  
TTY: Maine Relay 711  
Fax: (207) 776-6096  
Email: [accessibility@courts.maine.gov](mailto:accessibility@courts.maine.gov)

Revised 1/8/18